

Waa maxay waxbarashada Dugsiga Sare ee dadweynaha?

Dugsiga sare ee dadweynaha waxa uu u furan yahay dhammaan dadka waaweyn ee danaynaya in ay wax bartaan. Si ay u taabo gasho waxbarashada dadka waaweyn: waa inaad saamayn weyn ku yeelataa wada hadalka iyo doodaha si ay isku bartaan ka qaynb galayaasha kooraska (Tababrka). Dugsiyada kuu furan inaad wax ka barato waa 155 dugsi sare ee dadka waaweyn oo ku kala yaala dhamaan waddanka Sweden. Hadda, waxaa **1da feberaayo 2021** laguu furay Dugsiga sare ee Växjo oo ku yaala Ljungadalsgatan 2D, Växjo. Dugsigaas waxaa isku bahaystay: Dugsiga Sare daka waaweyn ee Grimslov iyo Adetförs. Dugsiyadan waxaa loo furay dhammaan dadka qaxootiga ah (Invandrare).

Maxay yihiin koorsooyinka ay bixinayaan?

- Koorsada guud ee heerka dugsiga hoose, takhsuska caafimaadka iyo qaab nololeedka waari kara muddada 1-3 sano.
Halkan waxaad ku baran kartaa u qalmida dugsiga khasabka ah. Hadafku waa inaad hesho dhibco sare oo la aqoonsan yahay ee luqada Swedishka (SFI) oo ah luqada 2aad, cilmiga bulshada, afka ingiriisiga iyo xisaabta fasalka 9aad. Intaas kadib, waxaad fursad u heli doontaa inaad wax ku sii barato heerka dusgiga sare ee waddanka oo dhan.
- Luqada Swedishka (SFI) ee Dugsiga sare ee dadweynaha 1-3 sano.
Luqada Swedishka ayaa loo bilaabayaa qofka magan-galyo doonka ah ee ku nool hoyga hay`adda socdaalka swedishka ee degmo walba. Kooraska aasaasiga ah ee loogu talogalay dadka soo galootiga ah ee cusub waaxay soconeysaa muddo 6 bilood ah (oo ay suutagi tahay in 6 bilood lagu kordhiyo) Markaad sharciga joogitaanka waddanka lagu siiyo, waxaa si rasmi ah kuugu bilaabanaya in laguu diyaariyo habkii aad waddanka ugu noolaan lahayd iyo in lagu tuso suuqa shaqada si aad u diyaarsatid xirfaddii aad ku shaqeysan lahayd.
- Dugsiga bulshadu wuxuu kuu suurtagelinaya inaad ku soo bandhigto taariikh nololeedkaaga waxbarasho, baahiyahaaga adoo qaadan doona tababarro gaaban oo 3 bilood soconaya si aad u tijaabisid maadooyin kala duwan si aad u horumarisid farsamooyinkaaga oo horumarinaya khradaada. Ogoow luqada swedishka iyo ingiriisiga waa furaha albaabka waxbarashada iyo shaqada.
- Dhamaadka tabbar kasta shahaado ayaad heli doontaa.
- Sideen u horumarin karaa nafteyda una baran karaa luqada Swdishka, xageense u raadiyaa jawaabka suaalahaas oo dhan?
- Haddaba jawaabta suaalahaaga jawaabteeda annagaa kuu haynee nala soo xiriir annagaa kuu sheegi doona wax badan oo ku saabsan koorsooyinka sida loo dalbado, deeqaha wabarasho iyo arrimo kale oo la mid ah.

- Soo booqo xafiisyadeena dadweyne ee waxbarashada si aad u heshid macluumaaad ku haboon baahidaada.

susanne.blomqvist@kronoberg.se

lotta.elmgren@kronoberg.se